



Niyadjabsanaan

Qof waliba wuxuu marmar dareemi karaa murugo iyo niyadjab, oo ma ahan wax lala yaabo. Laakiin taas waa laga gudbaa oo dib ayaa loo fiicnaadaa. Qof isku buuqsan oo muddo aad dheer u murugeysan oo niyadjabsan wuxuu u baahnaan karaa caawimaad si farxaddu ugu soo noqoto. Waxaa laga yaabaa inay qofka niyadjabsan ku adkaato shaqadu ama u baahdo hurdo badan ama ay ku adkaato in uu sameeyo waxyaalaha caadiga ah sida in uu bannaanka u baxo ama cunto kariyo.

Mararka qaarkood waxaa niyadjab laga qaadi karaa marka qofka ay ku dhacdo wax nolosha ku adag. Mararka qaarkood waxaa dhici kara in la niyadjabo iyadoo aysan wax ku dhicin ama uusan garanayn sababta uu u niyadjabsan yahay. Waxaa jira dad uu niyadjabku ku dhaco marar badan.

Waa maxay caawimaadda adiga iyo waalidkaa aad heli kartaan?

Qofka niyadjabsani wuxuu heli karaa caawimaado kala duwan si uu u caafimaado. Halkaan wuxuu qofku ka heli karaa in daawada laga caawino iyo in lala yeesho wadahalalo qoyska oo dhammi ka qaybgalaan. Haddii ayna daawada ama wadahaladadu wax tari waayaan, waxaa lagu daaweyn karaa koronto. Waxay u dhacaysaa in qofka maskaxda looga qabto koronto muddo dhawr ilbiriqsi ah. Waxaa mar walba lagu sameeyaa isbitaalka, qofkana waa la suuxiyaa si uusan xanuun u dareemin. Mararka qaarkood waxaa loo baahnaan karaa in isbitaalka la sii joogo muddo dheer, halka mararka qaarkoodna dhawr saac kadib guriga la aado. Badanaaba waxaa dhacda in daaweyntaas korontada la wado dhawr mar toddobaadkii in muddo ah.

Adigu carruur ahaan waxba kama samayn karto sidii caawimaadka waalidkaa u wanaagsanaan lahaa. Waxay u baahan yihiin caawimaadda qof xirfad u leh. Marnaba ma ahan qaladkaaga in waalidkaa xanuunsan yahay. Xaq ayaadse u leedahay inaad ogaato waxa waalidkaa ku dhaca iyo caawimaadda uu helayo. Taas waxaad wax ka weyddiin kartaa qof jooga isbitaalka, sida dhakhtarka waalidkaa.

Waa wax aad u dhib badan in lala joogo waalid caafimaadkiisu liito, sidaas awgeed waxaad adiguna xaq u leedahay inaad hesho caawimaad haddaad dooneyso. Tusaale ahaan qof ayaad kala hadli kartaa sida aad dareemeyso in waalidkaa xanuunsan yahay ama waxaad la kulmi kartaa qof ku sagan xaaladdaada oo kale. Haddaad dooneyso waxaad la hadli kartaa dhakhtarka waalidkaaga ama qof kale oo isbitaalka ka shaqeeya.

Marna keli ma tihid

**Waxaad geli kartaa Internet
oo ka baari kartaa boggagaan:**

**maskrosbarn.org • bris.se • kuling.nu • hjarnkoll.se
1177.se – ku dhiirro inaad ka sheekeyso • umo.se**

**Halkaas ayaad waqi kartaa si aad qof
u la hadasho ama u la kulanato dad kale
oo soo maray xaaladdaada oo kale:**

**Cumulus ee Nyköping:
0155-24 81 01**

**Isniin, arbaco, khamiis, jimce saacadaha 9–10
ama talaado saacadaha 13–14**

Niyadjabsanaan



LANDSTINGET
SÖRMLAND

www.landstingetsormland.se